

Na soo wac. Waxan halkan u joogognaa caawimo.

Haddii aad soo martay takoor oo aad doonayso:

- Tallo sharci oo ku saabsan sidii wax looga qaban lahaa takoorka kugu dhacay adiga
- Caawimaad sharci oo la xidhiidha codsi loo gudbiyo Human Rights Tribunal of Ontario

Na soo wac:

Telefoonka: (416) 597-4900

Telefoonka bilaashka: 1-866-625-5179

TTY: (416) 597-4903

Telefoonka bilaashka ah ee TTY : 1-866 612-8627

Laymankeena telefoonku waxay furanyihiin:

Isniin, Talaada, Arbaca & Jimce: 9 gh ilaa 5 gd

Khamiista: 2 gh ilaa 6 gd

www.hrlsc.on.ca

Ma aha dhammaan la dhaqanka aan cadaalada ahayni takoor. Si loo daboolo Xeerka, la dhaqanku waa inuu la xidhiidho astaamaha shaqsi ahaanta (tusaale. qolada, jinsiga) iyo meesha (tusaale. shaqada, guriga) Ku cad Xeerka.

Jinsi

Shaqo

Qolo

Guriyayn

Wacyigalin jinsi

Naafo



Malagu takooray? Ma u baahantahay caawimo sharci?

Human Rights Legal Support Centre (“Xaruntu”) waxay siisaa taageero sharci oo bilaash ah dadka ka gudbaya Ontario kuwaas oo xuquuqal insaanka hoosyimaad Xeerka Xuquuqal Insaanka Ontario uu ku xad gudbay.

Xuquuqal Insaanka Ontario

Nidaamka xuquuqal insaanka Ontario waxa uu ka samaysanyahay saddex wakaaladood oo kala gaar ah.

- **Human Rights Legal Support Centre** waxay siisaa caawimo sharci dadka la kulmay takoor oo hoosyimaad Xeerka Xuquuqal Insaanka.. www.hrlsc.on.ca
- Human Rights Tribunal waa meesha codsiyada xuquuqal insaanka lagu xereeyo oo lagu go'aamiyo. www.hrto.on.ca
- Guddida Xuquuqal Insaanka Ontario waxay horumariyeen xuquuqal insaanka iyagoo umaraya cilmi-baadhis, waxbarasho, iyo siyaasad, horumar. www.ohrc.on.ca

Xeerka Xuquuqal Insaanka Ontario waxa uu kaa ilaalinayaa in laguula dhaqmo si kala duwan oo xun meelo gaar ah oo ay ku jiraan:

- shaqooyinka
- guriyaynta
- barnaamijyada ama adeegyada dawladda (tusaale.dugsiyada, socdaalka ama booliska)
- stores, restaurants, etc.

Himilada sharcigu waa inuu ka hortago takoorka iyo dhibaataaynta oo ay sabab u tahay:

- **Qolo, midab, isirka, meesha uu kazoo jeedo, jinsiyadda, caqiido asal qooyimiyadeed** (diin)
- **Qaadashada gargaarka dawladda** (codsashada kaliya arrimaha guriyaynta)
- **Xaaladda guur iyo xaaladda qoys**
- **Rikoodhka dambiyada** (waxay khusaysaa kaliya shaqada iyo qofka qofka inay waajib tahay in la saamaxay)
- **Da'da**
- **Naaf** (muuqda ama aan muuqan)
- **Jinsi ama galmo** (doorashada jinsiga, uur, faraxumayn galmo, aqoonsiga jinsiga/rayi ka bixinta).

Human Rights Legal Support Centre waxay bixisaa **sharci iyo adeeyo taageero oo bilaasha ah** oo ay ku jiraan:

- **tallo** ku saabsan haddii xaaladaada ay dabooshay Xeerka Xuquuqal Insaanku
- **gargaar** in lagu raadiyo xal adiga
- Waxa laga yaabaa inaan awoodno inaan dejino goor hore dacwadaada
- **caawimo** ku saabsan codsiga xuquuqal insaanka oo loogudbiy ay Tribunal
- **Wakiil** dejintaa wada xaafoodka
- **wakiil** dhexdhexaadintaada Tribunal iyo dhegaysiga
- **Fulinta** amarka Tribunal.

Haddii aad umalaynayso inaad leedahay dacwada xuquuqada aadanaha

Naga soo booqo www.hrlsc.on.ca si aad u hesho wax ku saabsan adeegyadeena.

Na soo wac. Waxaad u baahan doontaa inaad noo sheegto waxa kugu dhacay (cidda, goorta, waxa iyo meesha), sida dacdadu kuu saamaysay iyo waxa magdhaw ama daawada aad rabto. Soo ururi wixii dukumentiyoo ee taageeraya dacwadaada. Ma jiraan markhaatiyo arkayay waxa kugu dhacay?

Booqo bogga internetka Tribunal www.hrto.ca wixii macluumaad ah eek u saabsan xeraynta codsiga xuquuqal insaanka.

Booqo bogga internetka Guddida www.ohrc.on.ca si aad u oogaato wax badan oo ku saabsan takoorka.

Adeegyada sharci ee luqadaada

Waxaan bixin karnaa adeega 140 luqadood. Na soo wac. Waxaanu kuu diyaarin doonaa inaan kugula hadalno luqaadda aad doorato.

Ka hortagidda takoor mustaqbalka

Haddii aad la kulantay takoor, Xaruntu waxay kaa caawinaysaa inaad hesho magdhaw maaliyadeed oo la xidhiidha waxyeelada aad la kulantay.

Marka xaruntu ay ku siiso caawimo sharci dejinta wada xaafoodka ama dhegaysiga Tribunal, waxaan sidoo kale kaa caawin karnaa inaad hesho natiijooyin kuwaas oo caawin kara kuwa kale. Tusaale ahaan, loo-shaqeeyahaaga, mulkiile guri ama adeeg bixiyaha ayaa laga yaabaa inuu kaaga baahdo:

- Samaynta Tirtiridda Takoorka
- Hirgalinta siyaasad takoor la'aan oo cusub
- Tababaridda dhammaan shaqaalaha arrimaha xuquuqal inshaanka.